

Codsiga Dheeraynta Xaddeynta Liiska warbixinta

Limitation Extension Request Checklist

1. Waxaad samaysay codsi loogu talagalay Dheeraynta Xaddeynta si aad u heshid saacado baddan haddii:
 - Waxaad buuxisey foomka Codsiga Dheeraynta Xaddeynta loogu talagalay Macamiisha Kayar Da'ada 21, Qaybta Adeegaha Bulshada iyo Caafimaadka 10-504, ama nooc kasta oo kamid ah codsi qoran midkaas oo noo sheegaya:
 - Magacaaga
 - Taariikhda dhallashadaada
 - Imisa saacadood oo dheeri ah ayaad codsanaysaa
 - Maxay tahay caawimaada aad u baahantahay si aad u dhammaystirtid nooca ay tahay hawlaha daryeelka shakhsiga (sidoo kale lagu magacaabo “Waxqabadka Nolosha Maalin laha ah” iyo “Qalabka Waxqabadka ee Nolosha Maalin laha ah”)
 - Maxay tahay caawimaada lacag la'aanta ah (sidoo kale lagu magacaabo “taageerada aan rasmiga ahayn”) aad haysatid ee loogu talagalay hawlaha daryeelka shakhsiga tooska todobaadka
 - Sababta aadan u haysan caawimaad kugu fillan oo ka ahaata daryeel bixiyaasha lacag la'aanta ah si aad u heshid samaynta dhammaan hawsha lagama maarmaanka ah
2. Waxaad bixin kartaa waxkasta oo warqad shaqo ama macluumaad ah taas oo aad jeceshahay in aynu ogaano si aynu muraajaco ugu samayno codsigaaga qoran. Halkan waxaa kuqoran fikrado tusaale yar oo kamid ah noocyada warqada shaqada taas oo ay dhici karto in ay nagu caawiso in aynu aragno sababta aad ugu baahantahay saacado baddan:
 - Qorshe Waxbarasho Qof oo hadda ah (IEP)
 - Qorshooyin daaweyn / qoraalka xusuusooyinka daaweynta
 - Dukumeentiyada qorshaha waalidnimo (loogu talagalay waalidiinta qabba caruur yar-yar kuwaas oo aan wadda noolayn)
 - Waraaqaha wakhtiga loogu talagalay daryeel bixiyaa(sha) hadda ah ee seddexda (3) bilood ee lasoo dhaafay
 - Diiwaano qoraal oo kusaabsan xaaladaada
 - Diiwaano qoraal oo kusaabsan wax kasta oo xaalado ah oo ay dhici karto in waalidiintaada ay qabbaan middaas oo kacelisa in ay awoodaan in ay wax kugu caawiyaan ama dhammaan hawlaha daryeelkaaga shakhsiga ah